

Caawimaad dhab ah. Oo hadadan la helayo.



\$100 Gunnada Keydka Korontada (Power Saving Bonus): Sida loo dalbado

Caawimad dhab oo la xiriirta qiimaha nolosha taas oo la siinayo dadka reer Victoria ee ugu baahida badan.

Dawladda Victoria waxay bixinaysaa caawimo dhab ah si ay wax uga qabato qiimaha nolosha oo ay hoos ugu dhigto biilasha tamarta ee dadka reer Victoria ee u baahida u qaba, iyada oo la siinayo lacag-bixin cusub \$100 oo Gunnada Beekhaaminta Korontada ah.

Laga bilaabo 25-ka bishii Agoosto 2025, dadka haysta kaadhka qiimo-dhimista (concession card) ee xaq u leh waxay dalban karaan Gunnadan iyagoo booqanaya websaydka Isubarbardhiga Tamarta Victoria (Victorian Energy Compare), si ay u xaqiijiyaan in heshiiska ay ku jiraan uu yahay kan ugu fiican ee ay heli karaan.

Victorian Energy Compare waa website madax-banaan oo ay dowladu maamusho kaas oo sahla inaad isbarbardhigto korontada, gas-ka iyo bixinta soolarka. Markay isticmaalaan website ka si aad markasta u eegto una bedesho qorshaha tamarta, dadka reer Victoria waxay sidaas ku heli karaan qiimaha ugu jaban ee korontada waxaana u baaqanaysa lacag.

Uma baahnid inaad ku wareegto qorshe kale oo koronto si aad u hesho lacag-bixintaas \$100 ah ee Gunnada Beekhaaminta Korontada. Kaliya u isticmaal website-ka si aad isugu barbardhigto qorshayaalka jira, waa wax aad u fudud, waxayna kaa caawinta inaad mid ka fiican.

\$100-ka ah Gunnada Keydka Korontada

Lacag-bixintan \$100 ee Gunnada Beekhaaminta Korontada waa deeq lacageed oo hal, taas oo loogu talagalay inay caawinto qoysaska guryaha degani inay xaliyaan biilasha korontada ayna sahlaan cadaadiska qiimaha nolosha.

Adiga oo isticmaalaya Victorian Energy Compare website si aad u dalbato, waxaa laga yaabaa inaad hesho beekhaamin cusub - aadna hesho \$100 oo bonus ah kolkaad sidaas samayso.

U qalmida/mudnaanta

Si aad u noqoto qof u qalma, qoysasku waxay u baahan doonaan:

- Inay heystaan biil koronto guri oo la degan yahay oo dhowaanahan ah
- Inay leeyihiin mid ka mid ah kaararka qiimo-dhimista (concession cards) ee soo socda:
 - Kaadhka Daryeelka Caafimaadka
 - Kaarka qiimo-dhimista (Pensioner Concession Card) ee loogu talagalay dadka hawlgabka
 - Kaarka Qiimo-dhimista ee Arrimaha Ciidamada Howlgabka noqday
 - Kaarka Dahabka ah ee Arrimaha Ciidanka

Goyskiiba hal mar ayay lacagtaas heli karaan.



Sida loo codsado

Si aad u codsatid, booqo barta internetka ee isbarbardhigga tamarta Victoria (compare.energy.vic.gov.au) ama ka codso khadka telefoonka (1800 000 832) ama shakhsiyan ugu tag Guriga Xaafada Neighbourhood House.

Caawimaad dhab ah. Oo hadadan la helayo.

Waxa markaas ay Isbarbardhigga Korontada Victoria (Victorian Energy Compare) ay kuu qaban karto:

- + Waxa ay is barbar dhigayayaan dalabyada koronto ee la heli karo iyo midka aad hadda adigu ku jirto si aad u aragto inay kaaga ka qaalisan yihiin ama ka raqiisan yihiin.
- + Waxay kuu baareysaa dalab kasta oo ay bixiyaan shirkadaha ka howlgala Victoria.
- + Waxay ku tusinaysaa dalabyada korontada cagaaran (green energy) iyo qiimo dhimista lagu sameynayo haddii aad solar qabtid.
- + Waxay isticmaashaa xogta gaarka ah ee qoyskaaga ama ganacsigaaga si ay u bixiso macluumaadka ugu fiican.

1

Soo hel biilkaagii korontada ee ugu dambeeyay.

2

Booqo compare.energy.vic.gov.au

3

Geli macluumaadkaaga oo hel dalabyada ugu fiican.

Is barbar dhig oo wax hakuu baaqdaan

Dadka isticmaalay barta internetka ee Isbarbardhigga Korontada Victoria sanadkii 2024 oo dhan waxay awoodeen inay u baaqato in ka badan \$240 markay u wareegeen heshiis koronto oo ahaa kii ugu jabnaa.

Guryaha La Degan Yahay iyo Ganacsiyada Yaryar

Isbarbardhigga Tamarta Victoria waxaa laga heli karaa dhamaan wixii dalabaad koronto ah ee loogu talagalay guryaha la degan yahay iyo ganacsiyada yaryar.

17.5% oo qiimo-dhimis ah

Dadka haysta kaadhka qiimo-dhimista (concession card) waxa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan qiimo dhimis 17.5% ah oo biilasha korontada sanadka oo dhan iyo biilasha gaaska ee xilli qaboobaha (bisha Maajo ilaa Oktoobar).

Website ka Tamarta ee Dawladda Victoria waxaa laga heli karaa macluumaad ku saabsan shaqada aan la qabanno shirkadaha iyo bulshada, si loo horumariyo mustaqbalka tamarta sugan ee Victoria.



Booqo energy.vic.gov.au/households

© Waaxda Tamarta ee Gobolka Victoria, Deegaanka iyo Ficilka Cimilada
Ogosto 2025

ISBN 978-1-76176-556-8 (Print)

ISBN 978-1-76176-557-5 (pdf/online/MS word)

Afeef

Daabacaaddan ayaa laga yaabaa inay ku caawiso laakiin Gobolka Victoria iyo shaqaalahaadu ma damaanad qaadayaan in daabacaadan ay tahay mid aan cillad lahayn nooc kasta oo ay ahaataba ama ay ku habboon tahay ujeedooyinkaaga gaarka ah, sidaas darteed ma qaadan doono wixii masuuliyad ah, ama khasaare ah ama cawaaqib kale oo ka iman kara haddii aad ku tiirsanaato macluumaad kasta oo ku qoran daabacadan.



Wixii caawimaad ku saabsan luuqadaha aan Ingiriiska ahayn, kala xidhiidh Adeegyada Fasiraada iyo Turjumaada (Translating and Interpreting Services - TIS) 131 450.

